



Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

Ku dhawaaqidda maamulaha cusub ee Rosa Parks, Kevin Walker

Juun 2019

Bulshada Rosa Parks ee qaaliga ah,

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqo in Kevin Walker uu ku laaban doono Dugsiga Hoose ee Rosa Parks, markan asagoo maamule ka noqon doono. Sida aan hubo oo ah in kuwa badan oo idinka mid ah ay ogyihiin, Kevin waxa uu ahaa Kaaliye Maamulaha Rosa Parks laga bilaabo 2016 ilaa 2018.

Kevin ayaa badali doono Tamala Newsome oo ka hawlgabayso maamulanimada dugsiga Rosa Parks oo ay ahayd tan iyo 2006. Tamala waxay dhextaal u tahay xaafadda iyo Dugsiyada bulshada Portland, waxaana hawlgabnimadeeda ugu rajaynaynaa wanaag.

Waxaan aaminsannahay in kevin aqoonta uu u leeyahay Rosa Parks iyo qaabkiisa hogaamineed ay sahli doonto kala-guur wanaagsan. Kevin wuxuu ku tilmaamanyahay xariiri la samaynta ardayda, soo dhawaynta aragtida kuwa kale iyo isu keenidda xubnaha bulshada. Sanadkii uu ka maqnaa Rosa Parks, wuxuu maamule ka ahaa Capitol Hill Elementary School, halkaas oo uu nidaamka iskuulka uu u badalay mid heer ku salaysan oo ka badalay mid hab-raaca maadooyinka ku salaysan kuna hogaamiyay qaadashada manhaj cusub.

Inta lagu jiray waqtigiisa Rosa Parks, Kevin ayaa diirada saaraya barista, gaar ahaan ka faaiidaysashada fursadaha banaan iyada oo la adeegsanayo tijaabooyin ku salaysan xogaha tacliinta, waxayna kor u qaadday kobcinta ardayga. Waxa uu ahaa hogaamiyaha barnaamijka waxqabadka "AVID" ee Rosa Parks wuxuuna dhisay habab iyo buug-yare loogu talagalay Nidaamka Taageerada ee kala sareeyo (Multi-Tiered).

Kevin wuxuu ka bilaabay shaqadiisa macalinnimo dugsiyada hoose ee Lakeland, Florida ka hor inta uusan u guurin Oregon 2012. Kadib markii uu macalin ka ahaa Woodburn muddo laba sano ah, Kevin wuxuu bilaabay inuu wax baro Dugsiyada bulshada Portland ee Faubion School 2014, halkaas oo uu ardayda ku hagay heerar sare xaga akhriska iyo xisaabta.

Kevin wuxuu haystaa shahaadada koobaad ee Waxbarashada Dugsiyada Hoose ee Jaamacadda South Florida iyo Shahaadad labaad ee Hogaanka Waxbarashada iyo nidaamka ee Jaamacadda Portland State University. Hadda wuxuu dhamaynayaa shahaadada sare ee hogaanka iyo nidaamka ee jaamacadda Portland state.

Fadlan maamule Walker dib ugula soo dhaweeyo Rosa Parks.

Kaaliyaha Agaasimaha Guud ee Scott Whitbeck.



Kevin Walker

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.